# Su'aalaha Inta Badan La iska Waydiiyo Dardaaranka

Common Questions About Wills

## Waa maxay dardaaran?

Dardaaranku waa uu sheegaa waxa aad rabo in laga yeelo lacagtaadda iyo hantidaadda ka dib kolka aad geeriyooto. Dardaarankaaga waxaad ku daraysaa qof aad doonaysid inuu hantidaada sida aad doonaysid u maamulo ama u qaybiyo. Qofkaa waxaa loogu yeeraa qofkii adiga wakiilka kaa ahaa, hadii aadan adigu qof magacaabin Maxkamadda Dhaxalka ayaa qof kuu magacaabaysa. Qofka wakiilka kaa ah mararka qaarkood waxaa loogu yeeraa hawl fuliye. Akhri xogtan kooban, *Su'aalaha Ku Saabsan Dhaxalka.*

## Maxaa dhacaya hadaan geeriyoodo anigoon dardaaran qorin.

Haddii aad geeriyooto dardaaran la'aan, waxaa jira sharciyo gobolku leeyahay oo dhiga sidda lacagtaadda iyo hantidaadda loo qaybinayo. Qoyskaaga ayaa loo qaybinayaan iyadoo la raacayo sida sharciga gobolku dhigayo. Xilahaaga iyo ilmahaaga ayaa ugu horeeya cidda dhaxalkaaga la siinayo. Haddii aadan lahayn xilo ama ilmo, waxaa la siin hantidaadda xigtadaadda kale.



Dadka qaarkii waxa ay ka walwalaan in dowladdu ay qaadan lacagtooda iyo hantidooda haddii ay geeriyoodaan iyagoon dardaarmin. Inay arrintani dhacdaa aad ayay u yar tahay. Gobolku wuxuu hantidaada qaadan karaa keliya hadii:

- Haddii aad geeriyooto hantidduna ay magacaaga kaliya ku qoran tahay, iyo
- Hadii **uuna jirin** qof nool oo aad dhalasho wadaagtaan ama dad aad soo korsateen oo sidaa aad qaraabo ku noqoteen
  - Haddii aad ku jirto kaarka Minnesota Medical Assistance dowladuna ay rabto inay u soo noqoto lacagta ay ku bixiso daryeelkaaga. Nidaamkan waxaa la yiraa "dhaxal kala soo noqosho." Arrintani waa ay dhici kartaa xataa haddii leedahay dardaaran sharciyeysan.

## Goorma *Ayaan Dardaaran u* baahnahay?

Dardaaran ayaad u baahan tahay hadii aad doonaysid:

- inaad uga tagto xoolo qof aad xiriir la leedahay oo aydaan isqabin
- inaad  uga tago xoolo saaxiib ama sadaqeysi intii aad xigtadda uga tagi lahayd
- inaad uga tagto in ka badan kala bar oo bar lacagtaadda iyo hantidaadda ilmahaaga uu xilo hore kuu dhalay (haddii aad dib u guursadatay)
- inaad wax walba uga tagto dad aan dhaxalkaaga waxba ka heli lahayn, ama ka heli lahaa wax ka yar inta aad rabto inay ka helaan, sidda ay dhigayaan sharciyadda gobolka ee ku saabsan qaybinta hantiddu. Waxaa jira jadwalka dhaxalka ee MN kaa soo laga helayo barta internetka ee xeer ilaaliyaha guud ee gobolka MN jadwalkani wuxuu tusayaa sida sharciga gobolku dhaxalka u qaybiyay.
- Aad doonaysid inaad alaabooyin cayiman siisid dad gaar ah
- Inaad qof dhaxalkaaga wax kule marka sharciga gobolka la fiiriyo aad qadisid
- aad ugu qaybiso lacagtaadda iyo hantidaadda si aan sinaan ahayn cidda dhaxalkaaga leh
- Inaad ilmo aan qaan gaadh ahayn u magacawdid qofka mas'uulka ka noqonaya
- inaad ka hor tagtid in qoyskaagu dhexdiisu hantida ku dagaalamaan

## Goorma ayaanan dardaaran u baahnayn?



Dardaaran uma baahnid hadii:

- Aadan haysan hanti dhul iyo guryo ah oo magacaaga keliya ahi ku qoran yahay. Hantidda ma guurtadda ah ee aad hayso ha noqoto mid aad adigu leedahay ama mid aad cid la leedahay oo ay tahay inaad lahaado inta aad nooshahay, ama amaaneyn ah.
- Aad haysatid hanti dhul iyo guryo ah oo magacaga keliya ahi ku qoran yahay, laakiin aad magacawday hal qof ama ka badan oo hantidaada lagu wareejinayo hadii aad geeriyootid kuwaas oo aad ka diiwaaangashan xafiiska hantida ma guurtada ah ee degmada. Akhri xogtan kooban halkan ka gal *Wareejinta Hantida Geerida Ka Dib*.

- Haddii aad leedahay dhaxlayaal lagu magacaabay akoonkaaga, sidda akoonadda bangiyadda,  lacagta ku jirta suuqa saamiyadda gada, ama akoonadda lacagta qofku markii uu hawlgab noqdo inuu helo loogu talagay.

- Waxyaabahaasi waa dhab:
  - Aadan lahayn wax dhul ah ama guryo ah oo magacaaga keliya ahi
  - Ku qoran yahay isla markaana warqadda mulkiyadda ee hantidaadana uuna ku qoray iyo akoonadda (qof ku dhaxlayaa) qiimaha hantidaaduna tahay $75,000 ama ka yar tahay.
  - Haddii ay kula quman tahay in hantidaadda loo qaybiyo sidda uu qabaan xeerarka dhaxlida ee kor ku xusan.



  Haddii ay saa tahay, qoysku waxa uu adeegsan karaa warqadda dhaarta (affidavit) si u helaan in akoonadda magacyadooda lagu qoro iyadoon la tagin maxkamadda dhaxalka. Eeg warqadayada xogta aruursan ah *Su'aalaha Ku Saabsan Dhaxalka*.

- Hadii aad rabto inaad lacag iyo hanti uga tagto xigtadda iyadoo la raacayo sida sharcigu u kala hormariyo xigtadda (a table of MN heirship). Tusaale, hadii hooyo ninkeedii dhintay oo laba caruur ah haystaa ay geeriyooto sharciga gobolku labada ilmood si is le'eg ayuu ugu qaybinayaa hantida. Haday marka hooyadu doonayso in sidaa caruurta wax loogu qaybiyo uma baahna inay dardaaran qorto, laakiin waxaa loo baahanayaa in maxkamadda dhaxalku ay soo dhex gasho.

## Hadii aan anigu aad u jirado oo aan hawsha qaban kari waayo miyuu qofka aan wakiishay hawlaha aan doonayo qaban karaa?

Maya. ma qaban karo dardaarankaagu wuxuu dhaqan gelayaa keliya markaad geeriyootid **ka dib.** Hadii aad doonaysid in qof wakiilka kaa ahi uu hawlahaaga qabto, hadii aad naafo noqotid ama qof aan arrintiisa maamuli Karin waa inaad siisid awood sharci ah oo qoraal ah oo uu ku maamuli karo dhaqaalahaaga isla markaana uu xaaladaada caafimaad go'aan kuugu gaari karo.

Akhri xogtan kooban, *Dardaaranka Caafimaadka* iyo *Wakiil Ka Noqosho Si Sharci Ah*.

## Maxaa dhacaya hadii hantida keliya ee aan leeyahay ayna lacag badan goynayn laakiin ay qiimo taariikheed ii leedahay?

Waxa aad u baahan tahay dardaraan haddii aad rabto inaad hubiso in waxyaabo cayiman ay helaan dad cayimani. Qiimaha waxyaabahaasi ma quseeyaan arrintan. Waxaad qortaa dardaaran iska fudud waxaanad ku lifaaqdaa liisto ay ku qoran yihiin hantida aad leedahay iyo cidda aad doonaysid in la siiyo.
Markasta oo hantidaada wax iska badalaan liistadana waxbaad ka badalaysaa, xataa hadii aadan dardaaranka waxba ka badalayn.



Waxyaalaha ay ka midka yihiin alaabooyinka sida, alaabooyinka la isku qurxiyo. Sawirada qoyska, warqadaha shakhsiga ah ee aad adigu qoratay, qalabka wax lagu hagaajiyo, alaabadda guriga waxay yeelan karaan qiimo taariikheed ama qiimo kale, laakiin ma wataan wax qoraal oo tusinaya cidda iska leh.
Hadii aadan shayyaddan ku darin dardaaranka, waxaa laga yaabaa inuu qaato qof aadan jeclayn inuu qaato, ama waxaa laga yaabaa in dadka dhaxalkaaga lihi ay isku khilaafaan qofka qaadanaya. Mararka qaarkood hantida qiimo taariikheedka lihi waxay abuurtaa khilaafka ugu wayn ee xubnaha qoyska soo kala dhex gala.

Dardaaran uma baahnid hadii aad hantidaada bixisid inta aadan geeriyoon ka hor. Xataa haddii aad leedahay dardaaaran, waxaa aad siin kartaa hantidaadda ciddii aad rabto ka hor inta aadan dhiman.

## Siddee ayaan ku hubin karaa in dardaarankayga la raaco?

Qofka aad wakiilatay wuxuu ilaalinayaa hantidaada inta ay biilkaaga bixinayaan. Ka dib kolka lacagta laga bixiyo kharashaadkaaga, waxa ay siiyaan lacagtaadda iyo hantidaadda dadka lagu magacaabay dardaaranka. Sidoo kale waxay hubinayaan sidii loo heli lahaa lacagta caymiskii nolosha eed ku jirtay iyo lacagtaadii hawlgabka la siinayay. Wakiilnimadu waa shaqo aad muhiim u ah. Hubi in qofka aad doonaysid inaad wakiilataa inuu rabo inuu hawshan qabto iyo in kale.

Wakiilkaaga Shakhsiyanka ah ayaa ka xareeya dardaarankaaga Maxkamadda Dhaxalka haddii:

- uu u baahan yahay amar maxkamadeed si uu bedelo magaca ku qoran hantidaada
- aad leedahay xool ka badan $75,000 aadana u magacaabin dhaxle
- uu jiro muran ku saabsan dardaaranka

## Waa Maxay Shaqada Maxkamadda Dhaxalku?

Maxkamadda Dhaxalka

- ayaa go'aamisa in dardaaranku uu sharci yahay iyo in kale,
- ayaa xukunta muranadda ku saabsan dardaaranadda, iyo
- soo saarida amaradda lagu bedelayo cidda ku qoran hantidda ma guurtada ah, gawaarida, iyo hantidda kale ee leh warqadaha mulkiilaha.



Hadii aadan dardaarankaaga ku darin qof wakiil kaa ah maxkamadda ayaa wakiil kuu magacaabaysa. Hadii hantidaada qiimaheedu ka hooseeyo $75,000 waxaa laga yaabaa in dardaarankaagu aanu u baahnayn inuu soo maro maxkamadda dhaxalka. Akhri xogtan kooban, *Su'aalaha Ku Saabsan Dhaxalka*.

## Ma u baahnahay foom gaar ah ama qareen si aan u sameeyo dardaarankayga?

Waxa aad ka heli kartaa foom fudud qaar ka mid ah goobaha lagu gado alaabta xafiisyada, khadka (online) ka, ama buuga iskaa-isu-caawinta. Foomamkaa waxaa dhici **karta** inay kuu shaqeeyaan laakiin la hadal qareen si aad u hubiso in foomku uu ku haboon yahay xaaladaadda uuna u hogaansamayo sharciga gobolka. Waxaad siddoo kale kaligaa qoran kartaa dardaaran la'naata foom.

Waxaa jira xeerar ay tahay inaad raacdo si aad uga dhigto dardaaranka mid sharci ah. Xeerarka midka ugu muhiimsani waa in loo baahan in **2 qof oo makhraati** ahi ay arkaan adiga oo saxiixaya dardaaranka. Iyana waxa ay u baahan yihiin inay saxiixaan. **Hadii aysan jirin 2 qof oo makhaarti ahi, dardaarankaagu ma sharciyeysna.** Makhraatiyaashu waa inaysan noqon cid lagu magacaabay dardaarankaaga waana in aysan noqon cid qoyskaaga ka mid ah. Makhraatiyaashu waa khasab inay noqdaan kuwa:



- Ka weyn 18
- Akhtiyaal u saxiixaya wax
- Miyirkoodu fayow yahay

## Ma u baahan tahay dardaarankaygu in la nootaayeyo?


Maya, Minnesota, uma baahnid inaad nootaayeyso dardaarankaaga si aad uga dhigto mid sharci ah. Laakiin Minnesota waxa ay kuu ogolaataa inaad ka dhigto dardaarankaaga "iskii-isu-cadeeye." Haddii aad rabto inaad taa sameyso waa inaad u tago nootaayaale. Dardaaranka iskuu-isu-cadeeynayaa waxa uu caawiyaa cadeynta in dardaarankaagu uu yahay mid sharciyeysan haddii maxkamad looga mudaco arrinta dardaaranka. Waxay kaloo dedejisaa maxkamada dhaxalka waayo maxkamadu waa ay aqbali kartaa dardaarankaa iyadoon la xiriirin makhraatiyada saxiixay.

## Ka dhigida Dardaarankaaga Iskii-Isu-Cadeeye

Si aad uga dhigto dardaarankaaga iskii-isu-cadeeya, makhaartiyeyaasha iyo adigu waxa aad u baahan tihiin inaad u tagtaan nootaayaale ka dibna aad dhamaantiin saxiixdaaan warqad dhaar ah "affidavit"  oo cadeynaysa cidda aad tihiin iyo in mid walba oo idinka mid ah uu ogaa inaad saxiixaysaan dardaaran. Hubi in aad dhamaantiin haysataan aqoonsiyadiina (ID) sawirka leh. Dardaaranka waxaa laga dhigi karaa mid iskii-isu-cadeeya markii la rabo.

## Halkeen Ku xafidaa dardaarankayga?

Dardaaranku uma baahna in maxkamad laga diiwaangeliyo marka la qoro ka dib, laakiin hubi in la heli karo ka dib kolka aad geeriyooto.  Waa inaad dhigtid meel amaan ah. Waxaad u dhiibi kartaa qofka aad wakiilatay maadaama qofkani yahay qof aad aamintay oo aad hubtid inuu dardaarankaaga siduu yahay u fulinayo. Ugu yaraan qofka wakiilka aad ka dhigatay waa inuu ogyahay meesha dardaaranka laga heli karo. Hadii aad dhigtay qasnadda guriga kuu taala ama sanduuqaaga bangiga gaysay waa inaad hubisid inay kala soo bixi karaan.



Gobolka Minnesota, maxkamadaha dhaxalka ama xafiisyadda maamulka maxkamadaha ayaa dadka dardaaranka u hayo iyagoon khidmad yar ka qaadanaya. *[riix xiriirka (link) ka dibna hoos tag iyo qaybta soo hoos galaysa Probate].* Tani waxa ay la mid tahay adigoo gelinaya santuukha amaanka ah ee alaabta la gashado.

- Maxkamaddu waa inay ka dhigtaa dardaaranka mid qarsoodi ah.

- Xilliga nololshaaddii oo dhan, haddii maxkamaddu ay haysay dardaaranka, waxaa kaliya oo adiga ama qof aad u siisay ogolaashaha inuu hayo la siin karaa haddii codsi qoraal ah la keeno.

- Mas'uul ay maxkamaddu magacowday ama hanti maamule ayaa eegi kara dardaaranka qof mas'uulka laga yahay ama hantidiisa la maamulo.

- Haddii aad u dhiibto dardaarnkaaga maxkamadda, maxkamaddu waxa ay siisaa dardaaranka qolyaha dhaxalkaaga ku shuqulka leh kolka aad geeriyooto.

Xaq baad u leedahay inaad wakhti kasto oo aad doonaysid aad la soo noqotid dardaarankaaga.

Hadii qareen kaa caawiyay qoritaanka dardaarankaaga, waxaa laga yaabaa inay kuu soo bandhigaan inay kuu hayaan dardaaranka. Marka hadii qareenku kuu hayo waa in qoyskaaga iyo qofka wakiilka kuu ahiba ay ogyihiin in qareenku dardaarankaagii hayo.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**